

## Aqoonsiga guulaha dadka cusub

Juun 10, 2022

Alberta waxay bilaabaysaa Abaalmarinnada Aqoonsiga Dadka Cusub (Newcomer Recognition Awards) si loogu dabaaldego guulaha muuqda ee dadka cusub ee gobolkan.

Dadka cusub waxay gacan ka geystaan soo kabashada dhaqaalaha Alberta iyo kala duwanaanshaha dhaqamada iyagoo door firfircoon ka qaadanaya bulshooyinkooda, dugsiyadooda iyo goobahooda shaqada, iyo iyagoo bilaabaya ganacsigooda. Abaalmarinnada Aqoonsiga Dadka Cusub ee Alberta waxay sharfi doontaa guulahan si ay u muujiso mahadnaqa dadka cusub oo ay dadka u wargeliso siyaabaha ay dadka cusubi uga dhigaan xaaafadaha, dugsiyada iyo dhaqaalahooda kuwo kala duwan oo loo wada dhan yahay.

"Dadka cusub waxay wax ku soo kordhiyaan bulshadeena. Maaddaama ay dawladda Alberta sii waddo soo jiidashada, soo dhawaynta iyo siihaynta dadka cusub iyadoo loo marayo Istaraatijiyyada Socdaalka ee Faa'idada Alberta (Alberta Advantage), waxaa muhiim ah in aan tusno dadka cusub in aan aragno oo aan qadarinno siyaabaha ay qiimaha ugu kordinayaan qaab-dhaqameedkeena, xoojinta dhaqaalahooda iyo kobcinta bulshooyinkayada. "

*Kaysii (Kaycee) Madu, Wasiirka Shaqada iyo Socdaalka*

Magacaabistu waxay furan tahay ilaa Luulyo 24, qof kastana wuxuu magacaabi karaa qof cusub oo ku hodmay gobolkan hawlo Isxilqaan ah, hoggaan, hal-abuur ganacsi, wax ku blirintooda tacliin ama xirfadahooda, iyo ficillada lagu caawinayo dhisidda gobol loo wada dhan yahay. Qaybo kala duwan oo abaalmarineed ayaa diyaar ah si loo aqoonsado guulaha dhalinyarada, haweenka, waayeelka, ganacsatada, aqoonyahannada, shaqaalahooda iyo dhisayaasha bulshada.

"Sharafbay ii ahayd inaan la kulmo dadka ku cuch gobolkan oo dhan, waxaana si joogto ah ii dhiirigeliyay go'aankooda,

### Xog la xiriirta

Abaalmarinta Aqoonsiga Dadka Cusub

### Warbaahinta kala duwan

Daawo sawirka dhacdada ([View the event photo](#))

Dhageyso shirka jaraa'id ([Listen to the news conference](#))

Daawo shirka jaraa'id ([Watch the news conference](#))

\*Waxa la heli doonaa dhacdada kadib

### Weydiimaha warbaahinta

Roy Dallmann

[Roy.Dallmann@gov.ab.ca](mailto:Roy.Dallmann@gov.ab.ca)

587-873-7140

Xoghayaha Warfaafinta, Socdaalka iyo Dhaqanka

halabuurkooda iyo adkaysigooda. Wuxaan ku dhiirigelinayaad dadka inay soo magacaabaan qof cusub oo wax ka bedela gobolkan.

Abaalmarinadan, wuxaan kor u qaadi doonaa sumcadda dadka cusub iyo doorka ay ka ciyaaraan ka dhigista Alberta meel barwaqo iyo soo dhaweyn leh."

*Muhammad Yaseen, Wasiirka ku-Xigeenka Socdaalka iyo Dhaqamada kaladuwan*

Bilaabidda Abaalmarinnada Aqoonsiga Dadka Cusub ee Alberta (Alberta Newcomer Recognition Awards), dawladda Alberta waxay sii waddaa inay tallaabo ka qaado dhaqamada kaladuwan iyo ka hortagga cunsuriyadda iyadoo ku dhiirigelinaysa bulshooyinka dhaqanka inay wadaagaan sheekadooda iyo guulahooda ee Alberta oo dhan.

Barnaamijka abaalmarintu waa mid ka mid ah siyaabo badan oo ay dawladdu ku taageerto dadka cusub si ay Alberta ugu wacaan gurigooda iyo la dagaalanka cunsuriyadda. Iyadoo loo marayo Xafiiska Caddaaladda ee Dadka Cusub (the Fairness for Newcomers Office), Alberta waxa ay si degdeg ah ugu soo celinaysaa dadka cusub shaqada iyada oo meesha ka saaraysa caqabadaha aqoonsiga aqoonta ajnabiga, ka caawinta dadka in ay ka faa'iidaystaan waxbarashadooda iyo waayo aragnimadooda si ay u gaaraan awooddooda buuxda.

Iyada oo qayb ka ah Qorshaha soo Kabashada Alberta (Alberta's Recovery Plan), dawladdu waxay sidoo kale u abuuraysaa fursado badan oo ay dadku ku yimaadaan Alberta, dhix deegaan bulshooyinka, bilaabaan ganacsiyo iyo abuurista shaqooyin badan. Iyadoo loo marayo laba dudur socdaal oo cusub, dawladdu waxay sidoo kale gacan ka geysaneysaa dib u soo nooleynta miyiga Alberta iyada oo meesha ka saaraysa caqabadaha oo dejisay dhismooyinka si ay u soo dhaweyso dadka cusub ee shaqo abuurka ee bulshooyinka maxalliga ah.

### Xaqiiqooyin degdeg ah

- Magacaabistu waxay furan tahay ilaa Luulyo 24.
- Abaalmarinada waxaa ku jira sagaal qaybood: Abaalmarinta Kobcinta Bulshooyinka Yaryar, Abaalmarinta Goobaha Shaqada ee loo Dhanyahay, Abaalmarinta Ruuxiga ee

Halabuurka, Abaalmarinta Hogaaminta Dhalinyarada,  
Abaalmarinta Horyaalka Cusub, Abaalmarinta Waxqabadka  
Xirfada iyo Tacliinta, Abaalmarinta Dhiirigelinta Ardayga,  
Abaalmarinta Saamaynta Dadka Cusub ee Haweenka iyo  
Abaalmarinta Ruuxda Sare.

- Magacaabista waa in lagu soo gudbiyaa bogga khadka tooska ah ee internetka.
- Si aad xaq ugu yeelato, dadka la magacaabayo waa inay:
  - qof kaliya ahaado (ma aha koox ama urur)
  - ahaanin qof abaalmarin hore qaataay oo la mid ah abaalmarinta Dowladda Alberta
  - ku dhasheen meel ka baxsan Kanada (laakin Kanada ku noolaa sanado badan)
  - yihiin dad deganaanshaha rasmiga ah ama muwaadin Kanadiyaan ah
  - aan lahayn xukun dambi ah oo aan cafis lagu helin
  - aadan noqon masuul la doortay
  - degan yihiin Alberta wakhtiga magacaabista
  - aad wax ku darsadeen Alberta



## ALBERTA'S RECOVERY PLAN

Alberta's Recovery Plan is a plan to breathe new life into Alberta's economy and create new opportunities for every Albertan. It's a plan to build, to diversify, and to create jobs.